



# Xarunta Guusha Ardayda Madow

Sebtember 29, 2022

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Bishan Sebtember 20, 2022, Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay cod wadajir ah ku ansixiyeen heshiis taariikhiga ah ee xarunta ardayda madow, iyada oo bilaabeen qorshaha horumarinta bulshada ee mustaqbalkooda ay ku meel mariyeen codka Xarunta Guusha Ardayda Madowga ah (CBSE) oo xaqiiqo jirta ah.

Haddaba si loo suurtagaliyo hawshani, waxaan ka faa'iideysaneynaa xikmada wada jirka ah ee bulshadeen Madow iyada oo la abuurayo iskaashiga hay'adaha sida [SEI](#), [POIC](#), [KairosPDX](#), Black Parent Initiative, iyo [Albina Head Start](#)—iyo Albina Vision Trust (AVT) oo iyadu kafaala qaadaneysa. AVT waa hay'ad kale oo saldhigeedu bulshada yahay taasi oo fudeydineysa dib u soo nooleynta iyo dib u habeynta lower Albina, halkaasi oo ay ku noolaan jireen dadka madow ee reer Portland (Black Portlanders), dadkaasi oo wax badan ku soo kordhiyey magaalada jiilaal fara badan.

Dadaalkani maaha ka kaliya wax ka qabanaya ballanqaadyadii aanu bulshadayada u qaadnay laakiin waxay sidoo kale muujineysaa qiyamkeena. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa waqti dheer loo aqoonsaday hufnaanteeda ku saabsan sida saameynta midab-takoorka iyo maalgashiga aan buurneyn uu raadka ugu yeeshay ardayda madow iyo guud ahaan dugsiyada ay u badan yihiin ardayda madowga ah ee PPS ay u horseeday inay yareeyaan faraqa guusha.

Sanadkii 2020, cod-bixiyaashu waxay ansixiyeen abuuritaanka xarunta CBSE inay qeyb ka noqoto ballan-qaadka maalgalinede kaasi oo wax lagaga qabanayo sidii loo casriyeyn lahaa Dugsiga Sarre ee Jefferson, machad bulshada madow lagama maarmaan u ah. Iyada oo ay sababtu tahay ballaarinta jidka Interstate-5 ee ku dhow Rose Quarter, Gobolka Oregon wuxuu oggolaaday inay bixiyeen kharashka ku baxaya raritaanka loo wareejinayo goob kale Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman, machad kale oo muhiim u ah bulshada madowga ah.

Dugsiyada Dadweynaha Portland, oo kaashanaya Xarunta Guusha Madowga, waxaa lagu hoggaamin doona dadaalada bulshada iyaga oo wargalin doona qorshaha horumartina CBSE, xaqiijinaya mashruucyada waaweyn iyo barnaamijyada la xiriira iskuduwida shaqada lower Albina sidii ay muujin lahayd himilooyinka cadaalada bulshada iyo sinnaanta jinsiyada. Hadafka CBSE waa sidii loo horumarin lahaa tayada dhaqanka Dadka Madow; mideynta dadka madow,



iyo kor u qaadista waayo-aragnimada waxbarashada madowga; iyo kor u qaadista natiijooyinka waxbarashada ardayda madow.

Istuudiyaha dugsiyada degmada, dardargalinta xallinta khilaafaadka, waxay taageeri doonaa sidii ay ugu fudeydin lahaayeen habkani- kaasi oo u oggolaanaya bulshadeenu inay iyadu gadhwadeen ka noqoto sidii aan riyadani ugu dhigi lahayn inaga oo wada jirtna mid suurtagal noqota.

Mahadsanidin,

Dr. Cheryl Proctor  
Deputy Superintendent of School Communities  
Executive Sponsor, Center for Black Student Excellence